

# Sinaanta Tamarta ee ee Kireysteyaasha

XAASHIDA XOGTA | MAARSO 2023  
[aceee.org/energy-equity-for-renters](http://aceee.org/energy-equity-for-renters)

## Caqabadaha Kireystaha iyo Doorka Tashiilida Tamarta iyo Xeerka Guryaha Qiimaha Jaban

Kireysteyaasha danyarta ah ayaa badanaa waajaha guryo tayadoodu liidato, kirooyin aysan qiimahooda awoodin, culaysyada badan oo la xariira qarashka tamarta, iyo nugaylkha dheeriga ah ee ay u nugul yihiin dhibaatooyinka isbadelka cimilada. Dib u habaynta iyo dayactirada tashiilida tamarta ayaa yareyn kara qaar kamid ah caqabadahaan, laakiin shaqaalaha dawlada hoose iyo kireysteyaashaayaana ka walaacsan inay barakicin doonaan dadka deegaanka—midkood si toos ah ayadoo la samaynaayo dayactiro keenaaya in dadka kireysteyaasha ah ka guuraan guryahooda ama si dadban ayadoo mulkiileyaasha guryuhu kordhinayaan kirada guryaha si ay u soo kabaan lacagta maalgelinta. Xaashida xaqjiqadu waxay guudmar heer sare ah ka bixinaysaa [galka Xogta ee Sinaanta Tamarta ee Kireysteyaasha](#) waxeyna qeexaysaa sida dalada hoose ay u adeegsan karto barnaamijiyada tashiilida tamarta, siyaasada guryaha qiimaha jaban, iyo xeeladaha hormarinaaya sinaanta si kor loogu qaado natijjooyinka kireysteyaasha laguna gaaraayo yoolalkooda cimilada iyo awoodista bixinta kirada. Ka fiiri galika wixii faafhaahin dheeraad ah.

# Xeeladaha Isku Dhafan ee Tashiilida Tamarta iyo Kahortaga Bara-kaca

Xeeladaha Isku Dhafan ee Tashiilida Tamarta iyo Kahortaga Bara-kaca ayaa uga jawaabi kara caqabadaha kireystaha labo qaab: gurmadka iyo kahortag.

**Xeeladaha gurmadka** waxay diirada saarayaan siinta caawimaad muddo kooban ah kireysteyaasha waxaan ku jira xeeladaha muhiimka ah.



**Fududaynta helitaanka caawimaada kirada iyo adeegyada guriga** ayaa siisa kireysteyaasha walaacsan hal meel oo ay kala xiriiraan caawimaada kirada iyo adeegyada guriga.

**Caawimaada talo bixinta kireystaha** waxay siisaa kireysteyaasha adeegyada sharciga oo bilaash ah, gaar ahaanna qareennada, marka qofku waajahaayo guri ka saarid.

**Xeeladaha kahortaga** waxey diirada saaraan ka hortaga soo noqnoqoshada iyo darnaanta caqabadaha—sida qarashaadka tirada badan ee kirada iyo tamarta iyo barakaca—si aysan u sii socon. Waxaa ku jira xeerarka hormarinta qiimaha jaban ee la xiriirta gaadiidka, iibsiga iyo dayactirka guryaha, sharchiyada fursada kireystaha ee iibsashada guriga, saamiyada qiimaha aban, iyo guri ka saarida cadaalada ah.



**Xeerarka hormarinta gaadiidka qiimaha jaban (TOD)** ayaa dhiiri gelinaaya abuurista aagaga dadka badan, lagu socon karo, ee isticmaallada isku dhafan leh oo diirada lagu saaraayo aagga ama meelaha u dhow astaanka gaadiidka. Dawladaha hoose ayaa ku dari karta shuruudaha dhismeyaasha bii'ada u roon mashruucyada goobaha TOD. Qaabkaan ayaa u sahlaaya dawladaha hoose inay si taxane ah u abuuraan guryaha gaarka ah ee qiimaha jaban ayna xal ugu helaan qarashaadka tamarta guriga, kirada, iyo gaadiidka ee qoysaska danyarta ah.



Waxaa intaas dheer, dawladaha hoose ayaa taageeri karta maal gelinna siin karta hormariyaasha higsiga ka shaqeeya, sida ururada khayriga ah ee guriyaynta, si ay ugu adeegsadaan barnaamijyadooda **iibsashada guryaha iyo dayactirka**. Ka mulkiilaha guriga ahaan, hormariyaha ayaa intaas kadib awooda inuu sameeyo dayactirada dhismaha, badqabka, iyo tashiilida tamarta ee guriga.



**Xeerarka fursada kireystaha ee talaabada iibka** (TOPA) waa farsamooyin looga hortagaayo barakicinta kuwaasoo u damaanad qaadaaya kireysteyaasha fursad ay ku iibsadaan dhismahooda haddii mulkiilaha gurigu doonaayo inuu iibsho.<sup>1</sup>



Dawladaha hoose ayaa sidoo kale u baahan karta dadka adeegyada helaaya ee guryaha diirada la saaraayo muddo dhawr sano ah ayadoo ku xiraya **caymida qiimaha** muddada cayiman leh lacagta kabista ah. Cayimaadaan ayaa xaqijinaysa in mulkiileyaasha guryuhu aysan kordhin kirada sabab la xariirta dayactirada guriga ay ku sameeyeen.



**Xeerarka guri ka saarida sababta leh** ayaa ka hortagaaya guri ka saarida sida saxda ah u dhacday laakiin aan marin kanaallada saxda ah ee sharciga. Taas badelka, xeerarkaan ayaa u sahlaaya mulkiileyaasha guryaha inay guryaha ka saaraan kireysteyaasha marka xaalado gaar ah jiraan oo kaliya.<sup>2</sup>

# Buuxinta Duleellada Maaliyada iyo Dhaqaalaha ee Dayactirada Tashiilida Tamarta

Dayactirada tashiilida tamarta ayaa badanaa muhiim u ah yareynta labadaba culaysyada tamarta qaaliga ah ee kireysteyaasha iyo wasaqda gaaska cagaaran ee guryaha diirada la saaraayo. Hase yeeshie, mulkiileyaasha guryaha kirada ah ayaa waajiji kara caqabado ka haysta xaqijinta dookhyada maalgelinta ama qarashaadka si loo sameeyo dayactirada tashiilida tamarta. Ayadoo la raacaayo naqshadii hore, waxaan aqoonsanaynaa afar shaqo oo muhiim ah oo dawladaha hoose qaadi karaan si ay u buuxshaan duleellada dhanka maal gelinta ama dhaqaalaha. Dawladaha hoose ayaa qaadan karta midkood ama dhawr kamid ah doorarkaan.<sup>3</sup>

DOORKAA DEEG BIXIYAASHA




**Macalimiinta** waxey ka shaqeeyaan bulshooyin leh tamar tashiilan, guryaha kirada ah, iyo dhaqaalaha; waxey xiriir ka dhex sameeyaan saamileeyda dhexdooda; waxeyna abuuraan qorsheyaal lagu abaabulaayo ilaha adeegyada.



**Fududeeyaasha** waxey yareeyaan culayska macaamiisha ka haysta helitaanka dookhyada maal gelinta iyo dhaqaalaha waxeyna la shaqeeyaan barnaamijiyada jira si loo fududeeyo helitaanka adeegyadooda.



**Hormariyaasha** waxey kor u qaadaan qiimaha agabka horey u jiray ayagoo taageeraaya adeegyada hadda la baxsho abuuraayana khibrada dhaqaalaha ee maxaliga ah.



**Maal geliyaasha** waxey abuuraan iskaashi lala sameeyo xarumaha dhaqaalaha si loo kordhiyo loona abuuro agabka dhaqaalaha ee hal abuurka leh.

## Tusmo Ku aadan Ol-oleyaasha Suuqqaynta, Waxbarashada, iyo Wacyi Gelinta

Dawladaha hoose ayaa la shaqayn kara **mulkiileyaasha guryaha** ayagoo la shaqaynaaya ururada mulkiileyaasha guryaha, fududaynaaya barnaamijiyada tashiilida tamarta, diiradana saaraaya dayactirada inta lagu jiro hormarinnaada kale ee dhismaha.<sup>4,5,6,7,8</sup> waxay la shaqayn karaan **shaqaalaha maamulka dhismaha** ayagoo fududaynaaya barnaamijiyada tashiilida tamarta, qabanaaya wicitaannada hubinta joogtada ah ee mudaysan si loo xaqijiiyo in faa;iidooyinka barnaamijika la xaqijiiyo, iyo kormeerida barnaamijika rakibaada tooska ah.<sup>9,10,11</sup> Ugu danbayntii, dawladaha hoose ayaa la shaqayn kara **kireysteyaasha** ayagoo aqoonsanaaya lana shaqaynaaya mulkiileyaasha guryaha ee xiiseynaaya barnaamijiyada tashiilida tamarta, la shaqaynaaya ururada bulshada diirada saaraaya, agabka xariirkka toos u siinaaya mulkiileyaasha guryaha iyo maamuelayaasha, cadaynaaya faa'iidooyinka ka baxsan tamarta, kana fiirsanaaya mashruucyada tashiilida tamarta ayagoo kaashanaaya kireysteyaasha guryaha mashruucayada laga fulinaayo.<sup>12,13,14</sup>

# Cabirada Dawlada Hoose Si loo Qarameeyo Isla Xisaabtanka sinnaanta

Dawlada hoose ayaa adeegsan karta cabirada isla xisaabtan sida qimaynada sinaanta ee nidaamka, miisaaniyada ka qaybgalka, cabirada sinaanta shaqada, iyo bixinta doorka go'aan gaarista rasmiga ah ee dadka deegaanka si qimayn sax ah loogu sameeyo sinaanta qorshaynta iyo dhaqan gelinta xeerka. **Qimaynada sinaanta hanaanka dhismaha** waa warbixinna qimaynta ee u baahan in dawlada hoose ay go'aansato sida xeerka ama barnamijka la doonaayo inuu u taageeraayo uuna u abuuraayo sinaanta isirka iyo bulshada. **Miisaaniyada ka qaybgalka** waa hanaan dadka deegaanka ama gudiga la doortay ay ugu codeynayaan sida loo qarash garaynaayo qaybo kamid ah miisaaniyada maxaliga ah.<sup>15</sup> **Cabirada sinaanta shaqada** waa warbixinno dawlada hoose u adeegsadaan uruurinta xog ku saabsan sinaanta ayna kula socdaan hormarka laga gaaray yoolalka. Dawlada hoose ayaa sidoo kale abuuri karta **goleyaasha go'aan gaarista ee rasmiga ah** sida gudi-doceedyada iyo goleyaasha siiya dadka deegaanka fursad ay door ugu yeeshaan qorsheynta magaallada.

## LIISKA TUSAALEYAASHA BARNAAMIJYADA

### Xeeladaha Isku Dhafan ee Tashiilida Tamarta iyo Kahortaga Bara-kaca.

- Kirada qimaha jaban iyo helitaanka adeegyada guryaha: [Washington, DC](#)
- Caawimaada gudiga kirada: [New York, NY](#)
- Hormarinta adeegyada gaadiidka ee qimaha jaban: [Denver, CO](#)
- libsiga iyo dayactirka guryaha: [Boston, MA](#)
- Tallaabooyinka fursada kireystaha ee iibsiga: [Takoma Park, MD](#)
- Cayimaadaha qimaha jaban: [Minneapolis, MN](#)
- Guri ka saarida cadaalada ah: [Washington, DC](#)

### Tusmo Ku aadan Ol-oleyaasha Suuqgaynta, Waxbarashada, iyo Wacyi Gelinta

- La shaqaynta mulkiilaha guryaha: [Fort Collins Utilities, CO](#)
- La shaqaynta shaqaalaha guryaha: Puget Sound\*
- Wada shaqaynta kireystaha: [Castle Square](#)

### Buuxinta Duleellada Dhaqaalaha iyo Miisaaniyada Dayactirada Tashiilida Tamarta

- Macalinka: [Boise, ID](#)
- Fududeeye: [Boulder County, CO](#)
- Hormariye: [New York, NY](#)
- Maalgeliye: [St. Louis, MO](#)

### Cabirada Dawlada Hoose Si loo Qarameeyo Isla Xisaabtanka sinaanta

- Qiimaynada sinaanta hab dhismeedka: [Washington, DC](#)
- Miisaaniyada ka qaybgalka: [Oakland, CA](#)
- Cabirrada hormarka sinaanta: [San Diego, CA](#)
- Laamaha rasmiga ah ee go'aan gaarista: [Providence, RI](#)

\* Warbixinta "Ku Dabiqida Maamulka Tamarta ee Istaraatijiga ah Qoysaska Badan: Waad Kaftamaysaa Soo maaha? Maya " ayaa qeexaysa sida maamuleyaasha barnamijku ay ula shaqeyn karaan shaqaalaha maamulka guryaha. Warbixinta waxaa lagasoo degsan karaa <https://www.aceee.org/files/proceedings/2018/index.html#/event/event-data/track>.

## Tixraacyada

1. K. Chapple and A. Loukaitou-Sideris, *White Paper on Anti-Displacement Strategy Effectiveness* (Sacramento: CARB (California Air Resources Board), 2021). [ww2.arb.ca.gov/sites/default/files/2021-04/19RD018 - Anti-Displacement Strategy Effectiveness.pdf](http://ww2.arb.ca.gov/sites/default/files/2021-04/19RD018 - Anti-Displacement Strategy Effectiveness.pdf).
2. Ibid.
3. A. Vanamali, *The DC Sustainable Energy Utility* (Winooski: VEIC (Vermont Energy Investment Corporation), 2018).
4. L. Ross, M. Jarrett, and D. York, *Reaching More Residents: Opportunities for Increasing Participation in Multifamily Energy Efficiency Programs* (Washington, DC: ACEEE, 2016). [www.aceee.org/research-report/u1603](http://www.aceee.org/research-report/u1603).
5. P. Garboden, "Amateur Real Estate Investing," *Journal of Urban Affairs* (2021). [doi.org/10.1080/07352166.2021.1904781](https://doi.org/10.1080/07352166.2021.1904781).
6. I. Luxton, B. Mellott, J. Schill, and J. Cross, *Engaging Multifamily Residents in Energy Conservation: A Toolkit for Municipalities to Support Property Managers in Long-Term Behavior Change* (Fort Collins, CO: Institute for the Built Environment, 2020). [ibe.colostate.edu/wp-content/uploads/2020/05/Multifamily\\_Resident\\_Engagement\\_Toolkit.pdf](http://ibe.colostate.edu/wp-content/uploads/2020/05/Multifamily_Resident_Engagement_Toolkit.pdf).
7. C. Martín, "What Strategies Are Needed to Implement Energy Retrofits Equitably and Practically," *Housing Perspectives*, July 5, 2022. [www.jchs.harvard.edu/blog/what-strategies-are-needed-implement-energy-retrofits-equitably-and-practically](http://www.jchs.harvard.edu/blog/what-strategies-are-needed-implement-energy-retrofits-equitably-and-practically).
8. ACEEE, *Effective Strategies for Achieving High Participation and Deeper Savings in Income-Eligible Multifamily Buildings* (Washington, DC: ACEEE, 2014). [www.aceee.org/sites/default/files/pdf/strategies-high-participation-multifamily.pdf](http://www.aceee.org/sites/default/files/pdf/strategies-high-participation-multifamily.pdf).
9. Luxton, et al.
10. J. Hayes, E. Bunzendahl, T. Jirikovic, C. Stewart, and M. Snow, "Applying Strategic Energy Management to Multifamily: You're Kidding Right? Nope," *Proceedings of the 2018 ACEEE Summer Study on Energy Efficiency in Buildings 2*: 1–13 (Washington, DC: ACEEE, 2018). [www.aceee.org/files/proceedings/2018/index.html - /paper/event-data/p048](http://www.aceee.org/files/proceedings/2018/index.html - /paper/event-data/p048).
11. ACEEE.
12. Luxton, et al.
13. K. Marshall, G. Romine, M. O'Connor, and K. Moy, "It's Not What You Say, but How You Say It: Message Testing to Improve Engagement and Customer Satisfaction," *Proceedings of the 2020 ACEEE Summer Study on Energy Efficiency in Buildings 8*: 153–64 (Washington, DC: ACEEE, 2020). [www.aceee.org/files/proceedings/2020/event-data](http://www.aceee.org/files/proceedings/2020/event-data).
14. BSC (Building Science Corporation), *Commercial Deep Energy Retrofit: Castle Square Case Study* (Westford, MA: BSC, 2019). [www.buildingscience.com/sites/default/files/2019-08-08 - \\_castle\\_square\\_retrofit.pdf](http://www.buildingscience.com/sites/default/files/2019-08-08 - _castle_square_retrofit.pdf).
15. PBP (Participatory Budgeting Project), *What Is Participatory Budgeting?* (New York: PBP, 2021). [www.participatorybudgeting.org/download/pbp-general-info-sheet/?wpdmdl=13374&masterkey=5ba414424841f](http://www.participatorybudgeting.org/download/pbp-general-info-sheet/?wpdmdl=13374&masterkey=5ba414424841f).